
المملكة العربية السعودية
الرئاسة العامة لشئون المسجد الحرام والمسجد النبوي
وكالة الرئاسة العامة لشئون المسجد النبوي
هيئة الأمر بالمعروف والنهي عن المنكر بالمسجد النبوي

**Somali**

# Siyaarada Masjidka Nabiga, Baraarujin iyo tusaalayn ruuxa Soo booqanaya




**Waxaa Qoray (Curiyey)**

**Dr: Cabdilaahi Naaji Almakhlaafi**



## Hordhac


**Cali Bin Saalax Almuxaysini**
Maamulaha Hay'ada
Wanaag -farista iyo Xumaan reebista- ee
Qaybta Arimaha Masjidka Nabiga

المملكة العربية السعودية
الرئاسة العامة لشؤون المسجد الحرام والمسجد النبوي
وكالة الرئاسة العامة لشؤون المسجد النبوي
هيئة الأمر بالمعروف والنهي عن المنكر بالمسجد النبوي

Somali

# Siyaarada Masjidka Nabiga, Baraarujin iyo tusaalayn ruuxa Soo booqanaya



Waxaa Qoray (Curiyey)

**Dr: Cabdilaahi Naaji Almakhlaafi**

## Hordhac

**Cali Bin Saalax Almuxaysini**
Maamulaha Hay'ada
Wanaag -farista iyo Xumaan reebista- ee
Qaybta Arimaha Masjidka Nabiga

تم فسح الكتاب باللغة العربية
برقم الإيداع: ١٤٤١/٣٧٩٢
ردمك: ٩٧٨-٦٠٣-٠٣-٢٥٠٠-٩

وترجم للغة الصومالية بواسطة :

**مؤسسة رواد الترجمة**

رواد الترجمة
نحو محتوى دعوي أمثل
يقدم رسالة الإسلام الصافية للبشرية بلغات العالم

بالتعاون مع إدارة

هيئة الأمر بالمعروف والنهي عن المنكر بالمسجد النبوي

**Siyaarada Masjidka Nabiga, Baraarujin iyo tusaalayn ruuxa Soo booqanaya**

• Hordhac ............................................ **7**
• HORDHAC ..................................... **10**
• MEELAHA LA OGOL YAHAY IN LA BOOQDO ........................................... **21**
• BARAARUJIN IYO TOOSIN KU SOCOTA BOOQDAHA MASJIKA NABIGA Sallalaahu Calayhi Wasallam ...................................**24**

***Waxaan ku bilaabayaa***
***Magaca Allaah Ee Naxariista***
***Naxariis guud (Muslim iyo Gaalba, Dad iyo Duunyaba) mid gaar ahna ugu naxariista Mu'miniinta (Maalinta Aakhiro)***

# Hordhac

Ilaahay ayaa mahad leh ka dhigay booqashada Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam. mid kamid ah kuwa ugu weyn ama ugu muhiimsan cibaadooyinka Illaah loogu dhawaado, kana yeeley salaada lagu tukado masjidkan mid ka darajo badan masaajidada kale marka laga reebo Masjidka Xaramka Makah, waxa kale oo Naxariis iyo Nabad galyo korkiisa ahaatay Nabigeena Muxamed, isagoo ah midka ugu sharaf badan umada ilaahay, waxa kale oo nabad galyo iyo naxariisi ahaatey: Ehelkiisa, saxaabadiisa (kuwii rumeeyey ee arkay), iyo cidii wanaag ku raacdayba dhamaantood ilaa iyo maalinta qiyaamo.

**intaa kadib:** Waxaa i farax galinaya inaan soo bandhigo Kitaabkan uu qoray Dr: Cabdilaahi Naaji Almikhlaafi, oo ah mid u qoran qaab

sahlan si faahfahsana uga hadlaya mawduucan dhinacyadiisa muhiimka ah, ee ay waajibka tahay in uu ilaaliyo qofka raba inuu soo booqdo Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam.

Wuxuu cadeeyay Booqashada sharciga waafaqsan iyo sida loo salaamayo Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, iyo labadiisa Saaxiib-Allaha ka raali noqdee- iyo meelaha la booqanayo Madiina dhexdeeda ee masjidka ka baxsan. Waxa intaas dheer Tusaalooyin iyo baraarujin uu u baahan yahay qofka Booqanaya oo waafaqsan Caqiidada Saxda ah ee laga dhaxlay kuwii inaga horeeyey ee ku dhaqmayey diinta sida saxda ah (salaf Al-saalix) kuwaas oo qiimo lahaa, caqiidadaan oo ku dhisan Kitaabka iyo Sunada Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, Hadaba muhiimada uu leeyahay kitaabkani darteed iyo waxa kusoo arooreyba waxaan ku dardaarmayaa in la daabaco oo la badiyo, Allana waxaan waydiisanayaa inuu ku anfaco ruux walba oo akhriya.

Farxad ayay ii tahay inaan si wayn ugu mahadceliyo Xukuumada Boqor Salmaan bin

Cabdicasiis iyo dhaxal sugihiisa Maxamed bin Salmaan Illaah ha xafido kuligoode, sida ay u daryeelayaan Labada Xaram ee shariifka ah, ugana haqab tirayaan dhamaan baahida ay u baahan yihiin dadka cibaadada u imanaya. Sidoo kale waxaa mahad leh Madaxa guud ee Arimaha labada Masjid Xaraam, Sheekh DR: Cabdiraxmaan Cabdicasiis Sudaysi, adeega wanaagsan ee uu ka hayo labada xaram, iyo taakulaynta aanan kala go'a lahayn ee uu siiyo Hay'ada wanaag farista iyo xumaan reebista ee ka tirsan wakaalada arimaha guud ee Masjidka Nabawiga.

Allaha ka abaal mariyo abaalmarinta teeda khayrka leh, hana waafajiyo iyaga iyo anagaba inaan shaqaale u noqono diinta islaamka iyo muslimiintaba. Naxariista iyo nabad galyada Illaahay ha ahaato Nabi Muxamed korkiisa iyo ehelkiisa iyo saxaabadiisa dhamaanba.

*Cali Bin Saalax Almuxaysini*

*Maamulaha Hay'ada Wanaag -farista iyo Xumaan reebista- ee Qaybta Arimaha Masjidka Nabiga.*

# HORDHAC

***Waxaan ku bilaabayaa Magaca Allaah Ee Naxariista Naxariis guud (Muslim iyo Gaalba, Dad iyo Duunyaba) mid gaar ahna ugu naxariista Mu'miniinta (Maalinta Aakhiro)***

Ilaahay ayaa mahad leh, Caalamka Rabigood ah, Naxariis iyo Nabad galyana ha ahooto korka Nabigeena Muxamed Amiin ah, iyo Ehelkiisa, Saxaabtiisi lahaa sumada quruxeed.

Intaa kadib : Walaalkayga soo booqday Masjidkanow Al-Salaamu Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakaatuh (nabadgalyada ilaahay, naxariistisa iyo barakadiisu dushaada ha ahaatee) kusoo dhawow si laab furan Magaaladii Rasuulka Sallalaahu Calayhi Wasallam.

Walaalkayga soo Booqdayow: Ummahad naq Ilaahay inuu ku siiyay caafimaadka iyo deeqsinimada, kuna waafajiyay inaad timaado magaaladii Rasuulka Sallalaahu Calayhi Wasallam. Haduu ilaahay ku siiyey fursadan, ogow in aysan awood u helin fursadaan in badan oo dadka ka mid ahi iyagoo jeclaa kuna dadaalayay. Hadaba marka aad soo gaadho

Madiina Al Munawara waxaa lagaaga baahan yahay inaad ku dhaqanto aadaab iyo asluub, taasi oo uu dhiiri galiyay Nabigii hanuunka Sallalaahu Calayhi Wasallam. aadaabtan oo lanaga rabo qofkasta oo muslim ah meel walba oo uu joogo, Madiinadii Mustafana (Sallalaahu Calayhi Wasallam) ay kusii haboon tahay inuu ku dhaqmo, tan oo uu dalbey Nabigu Sallalaahu Calayhi Wasallam. U mahadnaq Illaahay kuna soo waafajiyay inaad soo booqato Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, Masjidkan oo ah mid kamida sadexda Masaajid ee ugu fadliga badan, Waxa uu yidhi Nabigu Sallalaahu Calayhi Wasallam (Ha u dadaalin safar waxa aan ka ahayn sadex Masjid: Masjidka Xarramka (kacbada), Masjidkaygan (madiina) iyo Masjidka Al-aqsaa (qudus). xadiiskaa waxa wariyay Bukhaari iyo Muslim Illaah ha u naxariistee.

U mahad celi Ilaahay, uguna mahad celi inuu ku waafajiyay Booqashadaadan Masjidka aad ku timiday adigoo soo booqanaya Qabriga Nabi Muxamed, Sallalaahu Calayhi Wasallam. Waxaana waajib kugu ah inaad raacdo dariiqa

toosan ee Nabigu umadiisa u jideeyay, kuwii naga horeyey ee wanaagsanaana ay mareen Illaah ha u naxariistee.

Walaalkayga qiimaha leh ee masjidkan soo booqdayow: Marka aad doonto inaad timaado Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam. waa inaad isa soo Nadiifiso, soo dahaaro qaadato, soo udug sato (cadar iyo uunsi marsato), kana fogay urta qurmuun masjidka, Marka aad galayso masjidkana horaysii lugtaada midig oo dheh: (BISMILLAAHI WA AS-SALAATU WA AS-SALAAMU CALAA RASUULI ALLAAHI, ALLAAHUMA IQFIR LII DUNUUBII, WAFTAX LII ABWAABA RAXMATIKA, ACUUDU BILLAAHI ALCADIIM WA BI WAJHIHII ALKARIIM WA SULDAANIHII ALQADIIM MINA SHAYDAANI AR-RAJIIM) ducadan oo macnahedu yahay (Waxaan ku bilaabey magaca ilaahay, Waxey nabad galyo iyo naxariis korkiisa ahaatey Rasuulka ilaahay (Sallalaahu Calayhi Wasallam) Illaahayow iiga dambi dhaaf dambiyadeyda, iina fur albaabada naxariistaada, waxaan magan galayaa Illaaha

wayn iyo wajigiisaa qiima badan iyo awoodiisa waxaan ka magan galayaa Shaydaankii naxariista ilaahay laga fogeeyay.

Dabadeed u dhaqaaq dhanka ROWDADA SHARTA LEH, kuna tuko labo rakcadood -hadii ay kuu suurto gasho- hadiise uu jiro cidhiidhi fara badana ku tuko meeshii kale ee masjidka kaaga suurtowda, kana fogow mar walba inaad cidhiidhi ku samayso muslimiinta ama aad dhibto ama ay ku dhibsadaan, arintaan oo ah mid aan banaaneyn, adiga oo u yimid Masjidka Nabiga inaad ajar hesho, iska ilaali in dambi kaa raaco.

Intaa ka dib u bax dhanka Qabriga Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, si aadaab iyo daganaansho iyo xasilooni leh, hadii uu jiro cidhiidhi, ka fogow inaad cidhiidhiso, riixdo dadka kale, dib u dhigo, raadso wakhti kale oo ku haboon inaad soo salaanto oo cidhiidhiga dadku yar yahay, iska ilaali in aaney noqon booqashada qabriga Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam wakhtiyada Salaadaha waajibka kadib, waayo cidhiidhigu waxuu badan yahay wakhtigaas, Codkaaga kor ha u qaadin, midaas

wuu inaga reebay Ilaahay, isaga oo leh: (Kuwa xaqa rumeeyow ha ka kor yeelina codkiinna codka Nabiga, hana kula jahrina (qaylo, muran) hadal sida qaarkiin qaar ugula jahro (muranka) si aan camalkiinnu u burin idinkoon ogayn), (kuwa codkooda hoos u dhiga Rasuulka agtiisa kuwaasi waa kuwo Eebe imtixaanay quluubtooda dhawrsasho darteed, waxayna mudanyihiin dambi dhaaf iyo ajri wayn), Suurada Alxujuraat, (aayadaha 2,3)

Imaam ibnu Kathiir wuxuu ku yidhi tafsiirkiisa: Waa karaahiyo ah oo reeban in codka kor loo qaado Qabriga nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam agtiisa, sida ay karaahiyo uga ahayd agtiisa markuu noolaaba, maxaa yeelay wuxuu mudan yahay mar walba ixtiraam isaga oo nool iyo dhimashadiisa kadiba Sallalaahu Calayhi Wasallam.

Cumar bin Khadaab -Allaha ka raali noqdee- ayaa ka dhex maqlay Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam laba nin oo qaylinaya (murmaya) oo kor codkooda u qaadey, wuxuu ku yidhi: yaad tihin? halkeedse ka timaadeen? waxay yidhaahdeen: : Waxaan

nahay Reer Daa'if, wuxuu ku yidhi: hadii aad ahaan lahaydeen dadkii halkaan daganaa waan idin garaaci lahaa idinka oosaas uga dhex qaylinaya oo kor u qaadaya codkiina Masjidka Rasuulka Sallalaahu Calayhi Wasallam dhexdiisa. Waxaa wariyay imaam Bukhaari -Allaha u naxariistee-

Marka aad gaadho Qabriga Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam hortiisa, istaag si daganaasho iyo xasilooni leh kuna salaam sidan: As-salaamu Calayka Yaa Rasuula Allaah Wa Raxmatullaahi Wa Barakaatuhu (Nabad galyada ilaahay iyo Raxmadiisa iyo Barakadiisu kor kaaga ha ahaato Rasuulkii Illaahayow), As-salaamu Calayka Yaa Nabiya Allaahi (Nabadgalyo kor kaaga ha ahaato Nabigii Illaahayow), As-salaamu Calayka Yaa khiirata Laah min Khalqihii (Nabadgalyo korkaaga ha ahaato mid kuu Illaah ka doortay inta uu abuurey Sallalaahu Calayhi Wasallam), As-salaamu Calayka Yaa Sayyid Almursaliin Wa Imaamu Almutaqiin (Nabad galyo korkaaga ha ahaato midka hogaaminaya Rususha lasoo dirayow ahna hogaamiyaha kuwa Illaah ka baqa)

Waxa aan Qirayaa inaad gaadhsiisay Risaaladii, gudatayna amaanadii, umadana aad u nasteexaysay ood xaqa u sheegtey, una jihaaday jidka ilaahay, Allaha kugu jasaa'i siiyo waxa ugu wanaagsan ee lagaga abaal mariyo Nabi umadiisa (Allaahuma salli calaa Muxamed wa calaa Aali Muxamed kamaa salayta calaa Ibraahiima wa calaa Aali ibraahiima inaka Xamiidu Majiid, wa baarik calaa Muxamed wa calaa Aali Muxamed kamaa baarakta calaa Ibraahiima wa calaa Aali ibraahiim inaka Xamiidu Majiidu). (Illaahow u nabad yeel oo wanaaji Muxamed Sallalaahu Calayhi Wasallam iyo inta qaraabada u ah ee aamintay sidaad u nabad yeeshay una wanaajisay Ibraahiim Sallalaahu Calayhi Wasallam iyo inta qaraabada u aheyd ee rumeysay Adigu waxaad tahay mid mahad u leh awoodna uleh, Illaahow Barakee Muxamed Sallalaahu Calayhi Wasallam iyo inta qaraabada u ah ee rumeysay, sidaad u barakeysey Ibraahiim iyo inta qarabada u aheyd ee rumeysay adigu Illaaahayow waxaad tahay mid mahad leh oo awoodweyna leh).

Waxa kale oo kuu banaan inaad ku salaanto, salaamaha kale ee ku banaan sharciga, halkan u jeedadu waxa weeyi hadii aanad luqada carabiga ku odhan karin salaanta, waxaad ku odhaneysa afkaaga hooyo adigoo ilaalinaya sida shareecadu ay qabto ee diinta ku sugan.

dabadeed u dhaqaaq waxyar dhinaca midigtaada si aad u salaanto Khaliifkii Rasuulka Sallalaahu Calayhi Wasallam, Abuubakar Sidiiq -Allaha ka raali noqdee- oo dheh: As-salaamu Calayka Yaa Abaa Bakar As-sidiiq Wa Raxmatullaahi Wa Barakaatuhu, As-salaamu calayka yaa Khaliifata Rasuuli Allaahi Sallalaahu Calayhi Wasallam, midkii labaynayay maalintii godka, Allaha kaa abaal mariyo anaga iyo Islaamka iyo Muslimiinta abaal marin kheyr badan. waxaa kale oo lagu salaami karaa salaamaha kale ee sharcigu baneeyay.

dabadeed u dhaqaaq waxyar dhanka midigtaada si aad u salaanto Amiirkii Mu'miniinta Cumar bin Khadaab -Allaha ka raali noqdee- adiga oo dhahaya: As-salaamu Calayka Yaa Cumar Alfaaruuq Wa Raxmatullaahi

Wa Barakaatuhu, As-salaamu calayka Khaliifkii labaad ee khulafada Raashidiintow, Allaha kaa abaal mariyo anaga iyo Islaamka iyo Muslimiinta abaal marin kheyr badan. waxaa kale oo lagu salaami karaa salaamaha kale ee sharcigu baneeyay. Sidaas ayay ku dhamaystiran tahay Siyaaradii ama Booqashadaadii Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, iyo qabrigiisa iyo qabriga labadiisa khaliifba -Allaha ka raali noqdee-

Walaalkayga soo booqdayow Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam hadii aad rabto inaad ducaysato, waa inaad u jeedsataa dhanka Qiblada, goob walba oo aad ka joogto Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, iyo goor walba oo aad joogto habeen iyo maalinba, waxaana haboon inaad raadsato meelaha cidhiidhigu ku yar yahay, taasi ayaa u xasilan nafta iyo qalbiga lehna xasilooni dagan. Ilaahayna waydiiso una waydii walaalahaaga muslimiinta ah Khayrka Aduun iyo Aakhiraba.

Kana digtoonow walaalkayga sharafta lahow inaad xadgudub ku samayso ducadaada, sida:

in aad barido cid kale oo aan Ilaahay ahayn, gargaarna waydiisato, midaas waxay ka hor imanaysaa amarkii Ilaahay -kor ahaaye- iyo kii Rasuulkaba Sallalaahu Calayhi Wasallam, hadaad cid aan Illaah aheyn aad magacowdo ood ku duceysato waxay kugu ridaysaa Shirki (Illaah oo aad cid kale wax la wadaajiso); Illaah ayaa naga reebey inan barino cidaaan isaga aheyn, Ilaahay ayaa quraankiisa ku yidhi: (Masaajidda Eebaa iska leh ee ha kula baryina «caabudina» Eebe Cid kale), Suurada Aljin, Aayada 18.

Ilaahay kor ahaaye wuxuu yidhi: (Hadday ku warsadaan Nabiyow addoomadeydu xagayga aniga waan dhawahay waana ajiibaa (aqbalaa) baryada markay i baryaan, ee ha i maqleen iyaguna hana i rumeeyeen si aad u hanuunaan). Suurada Albaqarah, Aayada 186.

Ilaahay kor ahaayee wuxuu yidhi: (Wax ka dulmi badan ma jiro ruux baryi Eebe ka sokow waxaan ajiibeynin (maqleyn, u jawaabeyn) tan iyo maalinta qiyaamaha, kuwaan oo baryadoodana halmaansan (ogayn)). Suurada Alaxqaaf, Aayada 5.

Xadiis Ibnu Cabaas -Allaha ka raali noqdee- ka sheegay Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam inuu yidhi: (Hadii aad waydiisanayso Ilaahay waydiiso, Hadii aad kaalmo rabto Ilaahay kaalmayso) Waxaa wariyay Imaam At-tirmidi -Allaha u naxariistee-

Waxaad tidhaahdaa: (Allaahuma Shaffic fiya nabiyika walaa taxrimnii shafaacata Nabiyika Sallalaahu Calayhi Wasallam), kuna bari Illaahay isagaa xumaan ka nasihane jacaylka aad jeceshahay Nabigiisa Sallalaahu Calayhi Wasallam iyo raacida sunadiisa iyo camaladaada wanaagsan.

*Ogow walaalkayga booqdaha ahow in booqashadaadani iyo dariiqadan aad u duceysaneysa iney tahay hanuunkii Salafka Saalixa (kuwii naga horeyey ee raacey dariiqi Rasuulka ee saxda ahaa) Allaha u naxariistee-,*

## *MEELAHA LA OGOL YAHAY IN LA BOOQDO*

**MADIINA MUNAWARA EE KA BAXSAN MASJIDKA NABIGA:**

**1- Baqiic:** Waa Xabaalaha ay ku aasan yihiin in badan oo Saxaabadii, Taabiciyiintii iyo Salafkii hore ah, Rasuulkuna Sallalaahu Calayhi Wasallam wuu soo booqan jiray wuuna salaami jiray dadka meeshaas ku duugan una ducayn jiray

Marka hadaad tagto Baqiic, waad salaameysaa adiga oo odhanaya sidii Nabigeenu Sallalaahu Calayhi Wasallam odhan jiray: (Ass-salaamu Calaykum Ahla Ad-diyyaari minal Muminiina wa Muslimiina, Wa inaa insha Allaah la llaaxiquun, As Alullaaha Lanaa wa Lakum Alcaafiya) oo macnaheedu yahay: Salaan korkiina ha ahaato dadkan halkan ahaadow ee Muminiinta iyo muslimiinta ahow, anaguna waan idin soo haleeli doonaa (idinka daba iman doonaa), waxaan Illaahay inoo waydiinaynaa anaga iyo idinkaba in uu na caafiyo (saamaxo). Waxaa wariyay Imaam Muslim -Allaha u naxariistee- U ducee oo danbi dhaaf u waydii llaahay, Waa midaas mida la Baneeyay

kana digtoonow Walaalka muslimka ahow inaad ku dul istaagto Qabri ama aad ku fadhiisato, Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam waxa ka soo arooray inuu arintaas reebay isaga oo leh: (Ha u tukanina xaga Xabaalaha, hana ku dul fadhiisanina) Waxaa wariyay Imaam Muslim -Allaha u naxariistee-

Ka digtoonow inaad isku masaxdo Xabaalaha oo aad dhunkato, ama ciidooda (caradooda) aad qaatado, ama aad barido kuwa dhintay kuwani awood uma laha iney ku dhibaateyaan ama wax ku taraan (kuwaanu waxba kuuma qaban karaan adiga, waxey kaga baahan yihiin inaad adigu u duceyso, iska ilaali inaad qof dhintey kaalmo weydiisato waa shirki).

**2- Shuhadada dagaalkii Uxud:** Dagaalkaas Uxud wuxuu dhex maray Muslimiinta iyo gaalada, waxa ku shahiiday (waxa Illaah doortey) 70 Saxaabada ah, Nabiguna Sallalaahu Calayhi Wasallam wuu soo booqan jiray Xabaalahooda una ducayn jiray. Ogowna in la dilay iyaga oo difaacaya Diinta, xaqna ay inoogu leeyihiin inaan u ducayno oo aan raali ka noqono dhamaantood.

Marka aad soo booqato ku bilow mid la mida Salaantii Xabaalaha Baqiic oo ah mida lagu salaamo Xabaalaha muslimiinta dhamaan.

**3- Masjid Qubaa:** Nabigu Sallalaahu Calayhi Wasallam waxa uu tagi jiray Todobaad walba mar masjidkaas isaga oo korsan dabadiisi ama u lugeyn jirey, wuuna kusoo tukan jiray. Ruuxa taga ee kusoo tukada waxa uu la mid yahay Ajrigiisu ajarka Cumrada, Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam ayaa yidhi: (Ruuxa ku daahirsada Gurigiisa dabadeedna yimaada Masjidka Qubaa ee ku tukada dhexdiisa, wuxuu leeyahay Ajarkii Cumrada oo kale) Waxaa wariyay Imaam Ibnu Maajah -Allaha u naxariistee-

*ha dayicin fursadaas iyo khayrkaas wayn walaalkayga muslimka ahow.*

## *BARAARUJIN IYO TOOSIN KU SOCOTA BOOQDAHA MASJIKA NABIGA Sallalaahu Calayhi Wasallam*

Walaalkayga qiimaha leh ee soo Booqday Masjidkow:

• Ku dadaal adkaarta (ducooyinka) ku soo aroortay galida Masajidada marka aad galayso ama ka baxayso Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, iyo masaajidada kaleba.

• Dhabarkaaga ha foorarin marka aad Salaamayso Rasuulka Sallalaahu Calayhi Wasallam, una istaag si ay ku jirto daganaansho iyo xasilooni edeb leh.

• Ha isku masaxin gidaarada, tiirarka iyo albaabada Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, ama Dariishadaha, Minbarada, adiga oo is leh ka hel Barako, arimahaasi ma banaana.

Wuxuu ku yidhi Imaam An-Nawawi-Allaha u naxariistee- kitaabkiisa Almajmuuc (8/257) isagoo ka hadlaya in gacanta lagu masaxdo Qabriga Nabiga swc: (Ruuxa moodaya in gacanta oo qabriga lagu masaxdo Barako

badan tahay waa Jaahilnimo iyo Qaflad (war moog la'aan), Maxaa yeelay Barakadu waa wixii waafaqsan Sharciga Illaahay- koreeye-, kumana imanayso in la khilaafo amarkiisa).

Ogow Walaalkayga Booqanayow, in booqashadaadu lahayn wakhti go'an: ha gaabnaado ama ha dheeraadee, aynan leheyna salaado tiro go'an leh ha yaraato ama ha badnaatee, waxaana ka mida qaladaadka ka dhaca dadka soo booqanaya Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam inay u maleeyaan in ay waajib tahay in ay ku tukadaan masjidka salaado tiro go'an leh afartan iyo wax la mid ah, taasina ay ku keento culays uu isa saaro isaga iyo dadka la socdaba tan oo aanu Illaahay ku kalifin, tan oo qalad ah; mana jirto wax ka sugnaaday Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam oo tiro go'an ah oo ku waajibinaya qofka soo booqda masjidkiisa inuu tukado salaad tiro ah, waxaad ku tukan wixii aad awoodo kolba inta ay fursadaadu ku siiso ha yaraato hase badnaato.

Xadiiskan kusoo arooray in lagu tukado afartan salaadood ee ku sugan kitaabka Musnadka

imaam Axmed uu ka wariyay Anas binu maalik-Allaha ka raali noqdee- Nabiga salallaahu calayhi wasalam: (Ruuxa ku tukada Masjidkaygan afartan salaadood, oo midna dhaafayn, waxaa loo qoraa badbaado naarta ah, cadaabta oo uu ka badbaado, iyo badbaado munaafaqnimo). Xadiiskaas waa daciif.

xadiiska uu soo saaray imaam Tirmidi kana warinayo Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam inuu yidhi: (Ruuxa la tukada Jamaacada Afartan maalmood, ee haleela Takbiirada xidhashada, waxaa loo qoraa labo badbaado: Badbaado naarta ah, iyo badbaado munaafaqnimo ah), xadiiskanu waxa uu ka hadlayaa inuu qofku meel kasta oo uu joogo salaada jamaacada la tukado, haduu markaa afartan maalmood salaadiisa jamaaca la tukado ayuu bad baadadan helayaa. Xadiiskaanu waa sax inuu Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam kasoo arooray.

sidaa darteed waxa aan kuu dardaarmayaa walaalka booqanaya masjidka nabig inaad ku dadaasho helitaanka badbaadadaas, joog Madiina ama wadankaagee.

• Sida asalka ah Qofka ducaysanaya wuxuu u jeestaa dhanka qiblada, waxaase dhacda in dadka qaar u jeedsadaan jiho kale iyagoo gacmaha kor u qaadaya oo baryaya ilaahay isaga awood leh oo kor ahaadey kuwaan oo iyagu u jeediya wajigooga dhanka qabriga Nabiga sharafta leh Sallalaahu Calayhi Wasallam, arintaasina maaha mid ay samayn jireen dadkii hore ee diinta na soo gaadh siiyey ee iyagu cilmiga lahaa ee umada ka mid ahaa, ka digtoonow walaalkayow ficilada (arimaha) noocaas ah, kuna dhaqan wixii ay ku dhaqmeen Saxaabadii (kuwii Rasuulka Sallalaahu Calayhi Wasallam la joogey wakhtigiisi) iyo kuwii la kulmey kuwaa ee jidkooda raacey iyo kuwii wanaagsanaa ee muminiinta hore ahaa oo raac, ducadana qiblada ula jeedso.

• Ma banaana in waraaqo duco lagu qoray la dul dhigo dariishada qabriga Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, iyo Rowdada, ama meel kalaba oo masjidka ka mida, mana haboona in warqada laga soo qaado dad kale ama wadamo si loo keeno Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam.

• Ma banaana in lagu dawaafo (wareego) Qabriga Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, Dawaafku (wareegu) waa cibaado Alle inagu amray in lagu sameeyo kacbada oo kaliya.

• Ku dadaal walalkayga Soo booqday Masjidkaan inaad joogitaankaaga Madiina kasii qaadato sahay dhanka iimaanka ah, kuna dadaasho ku tukashada salaadaha Faralka ah masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, waliba Rowdada-shariifka dhexdeeda haday kuu fududaato taasi, maxaa yeelay waxaa ka sugnaaday Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam inuu yidhi: (Inta u dhaxaysa Gurigayga iyo Minbarkayga waxaa ah Beer beeraha Janada kamida). Waa Rowdada. waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim - Allaha u naxariisto labadoodabee-

• Xadiiskaas wuxuu ku tusayaa fadliga ay leedahay Rowdadu, ee ku dadaal inaad ku dhex cibaadaysato, quraanka ku akhrido, adiga oo aan ku samaynayn dadka kalena cidhiidhi ama dhibaato, midka ka fogaada shay Illaah dartii isaga oo ka baqaya inuu dadka muslimiinta dhib u geysto, Illaah baa ugu bedeli wax ka khayr badan.

Salaadaha faralka oo lagu takado safafka hore (raga) ayaa ka fadli badan in lahu tukado rowdada sida uu Rasuulku Sallalaahu Calayhi Wasallam yidhi: (Safafka midka ugu khayr badan dhanka raga waa midka ugu horeeya, midka u shar badana waa midka u danbeeya) Waxaa wariyay Imaam Muslim -Allaha u naxariistee-

Iyo hadalkiisa Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee: (Hadii ay dadku ogaan lahaayeen waxa ku jira (Ajar) Aadaanka iyo safka hore, oo ayna helayn inay u qori tuurtaan mooyee way samayn lahaayeen qori tuurashadaa). waxa wariyay Bukhaari iyo Muslim - Allaha u naxariisto labadoodabee- Macnaha (qori tuurkuna) waa u tartamid

Ogowna in Salaada kaliya ee lagu tukado Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam ay ka fadli badan tahay kun salaadood oo masjid kale ah, Marka laga reebo Masjidka Xaramka kacbada oo salaadiisa kaliya u dhiganto boqol kun oo salaadood, waa siduu yidhi Nabigu Sallalaahu Calayhi Wasallam: (Salaada masjidkaygu waxay ka fadli badan tahay kun salaadood oo masaajidada kale ah,

marka laga reebo Masjidka xaramka, Salaada Masjidka xaramkuna waxay ka fadli badan tahay boqol kun salaadaha masaajidada kale). Waxaa wariyay Ibnu Maajah iyo Axmed-Allaha u naxariistee-.

Ku dadaal akhriska Quraanka, digriga Illaahay, mahadnaqiisa, sadaqada oo aad la baxdo iyo inaad ku dhex ictikaafto (u hoyato adigoo cibaadeysanaya) masjidka Nabiga inta aad u helayso fursadba.

• Hadii aad u baahato wax su'aala dhanka diintana waydii culimada iyo macalimiinta joogta Masjidka Nabiga, Illaahay ayaa yidhi: {Waydiiya su'aalihiina culimada diinta taqaaan hadii aydaan aqoonin} Suurada Al anbiyaa, (aayada 7).

• Waxa kale oo aad helaysaa telfoono ku yaala albaabada masjidka iyo meelo kale oo ka mid ah masjidka oo hoos yimaada maamulka masjidka oo loogu talagaley cidii su'aal qabta iney isticmaalaan, kuwaan oo aad su'aashada weydin kana heli jawaabta aad u baahan tahay arimaha diinta ku saabsan dhamantood hadey tahay siyaaradada, cumrada iyo xajkagaba.

• Ku dadaal inaad ka qayb gasho Casharada iyo duruusta cilmiga ee culimadu ka akhriyayaan masjidka, si aad ugu dhaqanto odhaahda Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam: (Ruuxa yimaada Masjidkaygan ee aan u iman ilaa inuu khayr baranayo ama uu barayo mooyee, wuxuu la mid yahay martabada Mujaahid Illaahay dartii u dagaalamaya. Ruuxase u yimaada wax taas ka duwan wuxuu la martabad yahay ruux indhaha u taagaya alaab qof kale lee yahay). waxaa wariyay Imaamyada: Ibnu Maajah, Axmed, Alxaakim-Allaha u naxariisto dhamaantoodba-

Ha ilaawin walaakeyga cilmiga doonayow inaad booqato hadii aad hesho fursad aad ku soo booqato Maktabada Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, way haboon tahay, waxayna ku taalaa fooqa sare ee dhanka galbeed ee masjidka, marka aad tagaysana adeegso wiishka (elevator) numberkiisu yahay 10, waxaad ka heli wax ku anfaca.

Hadii aad jeceshahay inaad aragto Qoraalada kutubtii hore, soo booqo qaybta lagu kaydiyo ee ku taala dhanka Albaabka Cusmaan bin Cafaan -Allaha ka raali noqdee- tan oo oo ah kordhimihii

u dambeyey dowlada sacuudigu kordhisay masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam.

Sidoo kale waxaa ku yaala Irrida Cumar bin Khadaab (No:17aad) qayb ah maamulka Studio (cod duubta Duruusta iyo Khudbadaha iyo Salaadaha Masjidka) adeegan oo uu sahley u adeegihii Masjidka xaramka iyo masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, boqor Fahad Allaha u naxariiste, waxaana loo siiyaa hadiyad ahaan dadka soo booqda, hadii aad u dhiibato wax yaalaha wax lagu duubo sida cajalad iyo wax kasta oo wax laguugu dubi karo sida (falaash, memory card, harddisk) waxa kale oo ku yaala Irrida No:24 iyo 16aad qaybta haweenku ku tukadaan, Maktabad u gaara haweenka iyo mid ah studio (coded) irrida 28aad.

• Hore u soco oo buuxi safba safka uu ka horeeyo, hana fadhiisan meelaha irridaha laga baxo ama laga galo iyo jaranjarada, maxaa yeelay waxaad xidhaysaa irridii laga gali lahaa masjidka, dadkuna banaanka ayay ku tukanayaan iyadoo masjidkii wali buuxsamin. kuna dadaal adiga iyo walaalaha kale inaad

isku xidhaan safafka iskuna dhawaataan, si ay u noqdaan safaf dhamaystiran, masjidkuna u qaadi karo dad badan, oo ay dadku gudaha ku tukadaan.

Hadii aad u baahato inaad ku tukato safafka hore ama Rowdada, waa inaad hore u soo xaadirto masjidka, mana haboona inaad ka timaado gadaal ood dadka ka soo dul talaabsato ama kuwa tukanaya aad soo hor marto ood cidhiidhiso dadka tukanaya dhibna aad ugeysato, dhibaateynta muslimiintuna ma banaana.

Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam ayaa arkay maalin jimce ah nin ka dul talaabsanaya dadka, si uu ugu tukado safka hore, isaga oo ka khudbadaynaya minbarka dushiisa, inta uu khudbadii joojiyay Nabigu-Sallalaahu Calayhi Wasallam, ayuu ku yidhi ninkii: (Fariiso waayo waad dhibtay, ood habsaantee). Waxaa wariyay Ibnu Maajah iyo Axmed -Allaha u naxariistee-

macnaha oo ah waad dhibtey dadka sidaad uga dul talaabsanayso korkooda, waanad soo daahdey, hadii aad rabtay inaad xaga hore fariisatana waa inaad hore u timaadid oo aanad soo daahin,

• Ha marin dadka tukanaya hortooda, waxa nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, laga wariyay inuu yidhi: (haduu ogaan lahaa ruuxa hor maraya midka tukanaya danbiga ugu sugan hormarkaas, waxaa uga khayr badnaan lahaa inuu meeshaas taagnaado Afartan) Abu Nadri wuxuu yidhi: ma ogi ma Afartan maalmoodbaa, mise bilood, mise sanadood. Waxaa wariyay Imaam Bukhaari -Allaha u naxariistee-.

Wuxuu yidhi imaam Ibnu Xajar-Allaha u naxariistee- kitaabkiisa Fatxi baariga (1/ 585): Macanaha oo ah odhaahda: (inuu taagnaado afartan) waa haduu ogaan lahaa danbiga wayn ee ku jira ruuxa hor maraya mid kale oo tukanaya wuxuu ka doorbidi lahaa inuu halkaas taagnaado si uu uga badbaado danbigaas.

• Ku dadaal walaalka Soo booqdaha ahow nadaafada, jidhkaaga, dharkaaga, oo isticmaal waxyaabaha ku carfinaya, Maxaa yeelay? way dhibtaa Malaa'ikta wixii dhiba aadamaha.

• Ku dadaal ilaalinta nadaafada Masjidka, hana ku dhibin walaalahaaga kale muslimiinta inaad candhuuf ku tufto ama ku diifsato masjidka dhexdiisa ama banaankiisa, ama tiirarkiisa iyo

meelaha kale ee lagu cibaadaysto, waxaa kuu sugnaatey inaad ogaato qiimaha Masjidka, ogowna in candhuuf lagu tufo masjidka tahay qalad, sida laga wariyay Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, inuu yidhi: (Candhuuf lagu tufo masjidka waa gaf, waxaana lagu dhaafaa danbigeeda inaad daboosho oo la tirtiro). waxaa wariyay Bukhaari iyo Muslim - Allaha u naxariisto labadoodabee-

• Ka digtoonow in Ubadkaagu ku ciyaaraan masjidka, oo ay ku buuqaan, arintaasi waxay ka hor imanaysaa Aadaabta Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam,

• Ka fogow meelaha cidhiidhiga badan tagna meelaha dadku ku yar yahay een cidhiidhi aheyn, ogowna in fadliga salaada ajarkeeda ah in aad ku helayso meel walba oo masjidka ka mida.

• Walaalka booqdaha ahow : Marka aad dhamaysato salaadada ku nagow fadhiga, adiga oo akhrinaya digriga soo arooray salaada ka dib, hana ku dagdagin tukashada salaada Sunada ah inaad tukatid salaada waajibka kadib adiga oo aan wakhti u dhexeysiin

(yara sug oo duceyso kadibna tuko), si aad fursad u siiso dadka hore u baxaya ee leh cudurdaar ama aanad u cidhiidhin kuwa naafada ah, tan oo ah ka ilaalin in dadku dhib ku dhacan oo ay hor maraan qof tukanay.

• Walaalka booqdaha ahow, waa inaad ku dadaasho daganaansho, oo aanad ordin marka la furayo Rowdada ee daaha dumarka loo xidhey si ay markooda u tukadaan laga qaadayo, sida dadka qaar sameeyaan.

• Lagama saari karo Musxafyada (kutubta) quraanka Masjidka, maxaa yeelay waa waqfi, waxaana loogu talagaley in dadku ku dhex akhrisataan.

• Ha ku tiirsan armaajooyinka Musxafyada, kabahana ha dul saarin, korkoodana ha ka talaabsan,adiga oo ixtiraamaya Kitaabka Ilaahay subxaanahu wa tacaalaa

• Waa inaad hubsataa meesha aad dhigayso kabaha si ayna kaaga lumin. Dhamaan armaajooyinka lagu rito kabaha waxaa ku qoran nambaro, hubso midka aad ku ridato nambarkiisa, si aad ugusoo noqoto kabahaaga si dhib yar oo fudud.

• Ogow walaalka soo booqdaha ahow in masjidkan iyo masaajidada kaleba loogu talo galay cibaadada Illaahay, ha u isticmaalin meel aad seexato ama laga tuugsado ama aad ka baafiso wax kaa lumey.

• Ha u adeegsan caagadaha biyaha samsamka ee yaala masjidka kuwo aad ku wayso qaadato hana ka dhigan sijaadadaha Masjidka go' aad isku daboosho.

• Ka fogow inaad gogol dhex dhigato banaanka masjidka.

• Waxaa ka mamnuuc ah masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam banaankiisa in lagu cabo sigaar, waana in qofku ka ducaysado inuu Ilaahay ka daweeyo balada, Ogowna in Ehlu cilmigu cadeeyeen inuu yahay xaaraan iibkiisa iyo cabidiisaba, qofka cabana uu ku dambaabayo ee ka digtoonow maadaama aad u timiday inaad khayr soo biirsato.

• Albaabada masjidku dhamaan waxay leeyihiin magac iyo nambaro, mar walba lasoco albaabka aad ka gasho, si aanad u dhumin markad ka baxeysid Masjidka.

• Marka aad ku aragto albaabada cidhiidhi

iyo is riixriix, waxaa haboon inaad iska sugto inta uu dhamaanayo cidhiidhigaas ee lakala fududaanayo.

• Ha hilmaamin marka aad baxayso inaad hor mariso lugtaada bidix, adoo akhrinaya ducada lagaga baxo Masaajida: (BISMILAAH ALLAAHUMA SALI WA SALIM CALAA MUXAMED, ALLAAHUMA IQFIR LII DUNUUBII, WAFTAX LII ABWAABA FADLIKA), oo macnaheedu yahay: Bisinka ilaahay ayaan ku baxayaa, Allahayow naxariis iyo nabad galyo sii Nabi Muxamed, Illaahow ii danbi dhaaf iina fur albaabada Fadligaaga. waxaa wariyay imaamyada: At-tirmidi, ibnu maajah, Axmed. waana xadiis markhaati ku leh saxiixia Imaam muslim, Allaha u naxariisto dhamaantood

• Waxaan kuugu nasteexaynayaa inaad mar walba qaadato cinwaanka kaadhka meesha aad dagan tahay, si hadaad dhunto usoo tilmaamsato.

• Hadii aad kula kulanto qof xanuunsan Masjidka Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam dhexdiisa, waa inaad gaadhsiisaa ood u sheegtaa

shaqaalaha taagan Albaabada ama masjidka dhexdiisa ama qof kasta oo ka sheqeeya Masjidka oo iyagu sita telefoonada bilaa xadhiga ah ee lagu wadahadlo.

• Korka sare ee masjidka waxaa la furaa Maalinta Jumcaha, iyo shanta salaadood iyo marka cidhiidhi jiro, sidaa darteed hadii aad ka dareento cidhiidhi masjidka dhexdiisa isku day inaad u baxdo korka sare, waxaad halkaa ka heli doontaa cidhiidhi la'aan hadii Illaah yidhaahdo.

• Waxaa ugu diyaarsan dadka waawayn ama curyaamiinta gaadhi-gacan Albaabka (NO: 8), oo ah dhanka galbeed ee masjidka, si ay u adeegsadaan mudada ay joogan.

• Ha ku tukan Safafka ku yaala qiblada Masjidka ee ka hor marsan imaamka, marka uu cidhiidhigu badan yahay, tani waxey ka hor imanaeysaa cilmiga diinta aan ku dhaqano, waa inaad imaamka ka dambeysaa.

• Raac oo isku day inaad dhageysato talooyinka ay ku siiyaan shaqaalaha Masjidku, waxa ay u joogaan waa siday kuugu adeegi lahaayeenee oo ay kugu fudeydin lahaayen booqashadada.

• Ku qaado wakhtigaaga intiisa u badan inaad is hoos dhigto Illaahay ood barido, adiga oo mar walba la imanaya balan qaad aad Illaah la galeyso iyo codsi dambi dhaaf run ah, ogowna xaqiiqda aadaabta Illaahay isaga awood leh oo kor ahaadeye inay tahay jeceylkiisa isaga xumo ka hufnaadeye iyo kor yeelidiisa iyo kali u yeelida caabudida (in aad caabudid isaga oo kaliya), aadaabta Rasuulkiisa Sallalaahu Calayhi Wasallam lagula dhaqmana waa in la raaco sunadiisa iyo dariiqii ay mareen Asxaabtiisu (kuwii la joogey markuu noolaa) kuwan oo iyagu adaabta ilaaliyey kadib markii la oofsaday Rasuulka Sallalaahu Calayhi Wasallam.

• Ugu danbayn: Waxaan kuu dardaarmayaa walaalka Soo booqdaha ahow inaad badiso Saliga Nabiga Sallalaahu Calayhi Wasallam, waxaa laga wariyay Camru ibnu AI-caas- Allaha ka raali noqdee- inuu ka maqlay Rasuulka Sallalaahu Calayhi Wasallam oo leh: (Ruuxa igu saliya Illaahay ayaa xusa toban mar). Waxaa wariyay Imaam Muslim,iyo imaamyo kale.

Badi Ducada soo aroortay, isuna dulee Alle, oo magan gal kaligii, meesha aad joogto waa meelihii ducada lagu aqbalayay, hana hilmaamin inaad u ducayso Waalidkaaga, Ehelkaaga, Ubadkaaga, iyo walaalaha kale ee Muslimiinta ahba meel ay joogaanba.

*Wa Sallallaahu Calaa Sayidinaa Muxamed Wa Calaa Aalihii Wa Saxbihii Ajmaciin.*

ح  عبد الله ناجي محمد المخلافي ، ١٤٤١هـ
فهرس مكتبة الملك فهد الوطنية أثناء النشر
المخلافي ، عبد الله ناجي محمد
زيارة المسجد النبوي الشريف مع تنبيهات وإرشادات للزائر . /
عبد الله ناجي محمد المخلافي ـ ط٢. . ـ المدينة المنورة ، ١٤٤١هـ
٣١ص ؛ ١٧x١٢سم
ردمك: ٩ـ ٢٥٠٠ـ ٠٣ ـ٦٠٣ـ ٩٧٨

١- زيارة المسجد النبوي   أ.العنوان
ديوي ٢١٥,٢                    ١٤٤١ /٣٧٩٢

**رقم الإيداع: ١٤٤١ /٣٧٩٢**
**ردمك: ٩ـ ٢٥٠٠ـ ٠٣ ـ٦٠٣ـ ٩٧٨**

**حقوق الطبع محفوظة**
**إلا لمن أراد طبعه وتوزيعه مجانًا**
**بعد أخذ إذن خطي من المؤلف**

**عنوان المؤلف:**
**المملكة العربية السعودية، المدينة المنورة**
**الهاتف الجوال: ٠٠٩٦٦٥٠٤٣٤٥٢٤٥**
**البريد : anm1425@gmail.com**


**الطبعة الثانية**
**١٤٤١هـ**

المملكة العربية السعودية
الرئاسة العامة لشئون المسجد الحرام والمسجد النبوي
وكالة الرئاسة العامة لشئون المسجد النبوي
هيئة الأمر بالمعروف والنهي عن المنكر بالمسجد النبوي

صومالي

# زيارة المسجد النبوي الشريف

## مع تنبيهات وإرشادات للزائر



تأليف

د. عبدالله بن ناجي المخلافي

تقديم

الشيخ علي بن صالح المحيسني

مُدِيرُ هَيْئَةِ الأَمْرِ بِالْمَعْرُوفِ وَالنَّهْيِ عَنِ الْمُنْكَرِ
بِوَكَالَةِ الرِّئَاسَةِ الْعَامَّةِ لِشُؤُونِ الْمَسْجِدِ النَّبَوِيِّ